Boggan wuxuu sharxayaa sida Golaha Deegaanka Magaalada Bristol uu soo geli karo guryaha dawladda hoose marka uu kiraystuhu uusan noo ogolaanin in aanu soo galno.

Waxaan u aragnaa in na loo diiday inaannu kuriga soo galno haddii:

1) kiraystuhu si toos ah noogu sheego inaynan guriga soo geli karin gabi ahaanba.
2) kiraystuhu noo diido inaanny samayno dayactirrada aannu rabno inaanny samayno, ama
3) kiraystuhu aannu jawaab ka weyno marka aannu la soo xiriirno.

Haddii aanan awoodin inaannu soo galno gurigaaga annagoo si macqul ah hore kuugu soo sheegnay, waxaannu mar kasta raaci doonnaa nidaamka caadiga ah oo ah saddex jeer aanny isku dayayno iyo isku dayga ugu dambeeya lagugula soo xiriirayo ka hor inta aynan tallaabo sharci ah qaadin.

Kaddib saddex isku day, haddii aynan weli awoodin inaannu samayno dayactirka, Xafiiskaaga Guriyeyntu wuxuu kula soo xiriiri doonaa si uu u ogaado haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah. Waxay ku weyddiin doonaan su’aalo si ay u ogaadaan haddii aad u baahan tahay wax ka beddel si macquul ah loo sameeyo si aannu guriga u soo galno. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaynan guriga imanin waqtiyada qaarkood oo aad mas’uuliyad daryeel leedahay, ama ay waqti dheer kugu qaadanayso inaad albaabka timaaddo ama aad u baahan tahay turjubaan.

Tallaabo sharci ah ayaa la qaadaa kaddib isku dayga ugu dambeeya oo lagugula soo xiriirayo, taasoo noqon karta amar maxkamadeed oo guriga lagu soo galayo ama, xaaladaha degdegga ah iyo xaaladaha qaarkood, warqad maxkamad ka soo baxday si guriga loo soo galo.

Golaha Deegaanka Magaalada Bristol wuxuu mas'uul ka yahay in uu hubiyo in guryaha dawladda aan bixinno ay yihiin kuwo si bedqab ah loogu noolaan karo. Waxa kale oo na saaran waajibaadyo kale oo ah inaannu la marmar la soconno xaalladda dadka guriga. Mararka qaar waxaannu soo dirnaa qandaraasleyaal si ay dayactir u sameeyaan iyaga oo wakiil naga ah waayo shaqada ay xirfad u leeyihiin.

Heshiiska kirada waa qandaraas sharci ah oo sida xuquuqdeenna iyo waajibaadkeenna anagoo ah mulkiile dawladeed, iyo xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga adigoo ah kireystaha dowladda guriga golaga deegaanku leeyahay. Xuquuqdeenna si aannu u soo galno gurigaaga iyo masuuliyaddaada ah inaad noo ogolaato soo gelitaanka guriga waxaa lagu xusay qodobka 2.13 ee heshiiska kirada, waana mid ku saabsan dhammaan adeegyada hoos ku xusan.

---

[Saxiix Fiidiyowga BSL adeegga tarjumaadda ee dadka dhegaha la’]

---

Waxaa jira sababo badan oo uu Golaha Deegaanka Magaalada Bristol uga baahan karo inuu soo galo kirada ah ee dawladda. Hoos waxaa ku qoran taxa Adeegyada Guryaha iyo Mulkiilaha Guriga oo laga yaabo inuu u baahdo inuu soo galo gurigaaga.

Cinwaan kasta waxaa ku hoos qoran sharraxaad ku saabsan sababta loogu baahan karo in guriga la soo galo, laakiin waxaa laga yaabaa inaad la xiriirto adeegga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, tusaale ahaan, goorta la filayo in dayactirku billowdo iyo shaqada ay qabanayaan.

**Badbqabka Gaaska**
Golaha Deegaanka Magaalada Bristol waa inuu soo eego habsami u shaqaynta adeegga gaaska guriga kirada ah ee dawladda sanad kasta. Waa halishaddii gurigaagu uusan lahayn Shahaadada Bedqabka Gaaska ee shaqaynaysa, sidaas darteed waxaannu isku daynaa inaannu sameyno adeegga gaaska 2 bilood ka hor inta aysan shahaadadu dhicin.

**Bedqabka Korontada**
Golaha Deehnaak Magaalada Bristol waa inuu soo eego habsami u shaqaynta adeegga korontada ugu yaraan hal mar 5 sano gudahood ah.
Sidoo kale, haddii kireystuhu soo sheego cillad koronto guriga ka jirta, waa inaannu awood u leennahay inaannu soo galno guriga si aan u hubinno in fiilooyinku halis aysan lahayn. Arrintani waxay u baahan kartaa inaannu soo galno gurigaaga xitaa haddii cilladda koronto ay ka jirto meel kale.

**Ka Badqabka Dabka**
Golaha Deegaanka Magaalada Bristol waa inuu waa inuu soo baari in halis dab guriga ka jiri karo ugu yaraan hal mar sanadkii si loo:

- Hubiyo in qalabka korontadu bedqab leeyahay , sida qalabka ka diga dabka , qalabka dambka lagu damiyo si loo xaqiijiyo inay habsami u shaqeynayaan loona adeegsan karo xaalad degdeg ah.
- Hubiyo albaabbada dabka si loo arko inaysan burbur ama waxyeello soo gaarin, oo aysan sababin inay dabka ama qiiqa celin waayayaan.

**Asbestos**
Golaha Deegaanka Magaalada Bristolwuxuu u baahan yahay inuu galo guryaha kirada ah ee la ogaaday inuu leeyhay Asbestoska si loo hubiyo heerka halista loona xaqiijiyo in halusta la xakameeyey.
TUSAALE : haddii kireystuhu sameeyay dayactir aan loo oggolaanin iyo in la ogyahay inuu asbestos ka jiro guriga, waa inaannugurigu yahay mid bedqab ah.

**Dayactirka Kaddib Cilladaha La Soo Sheegay**
Golaha Deegaanka Magaalada Bristol wuxuu u baahan yahay inuu soo galo guriga si uu u fuliyo dayactirka loo soo sheegay, si degdeg ah ama qorshaysan si loo xaqiijiyo in guryaha dawladda yihiin kuwo bedqab ah oo xaalad wanaagsan ku sugan.

Dayactirka degdegga ah waa in si dhakhso ah loo qabto sababtoo ah waxay cilladuhu halis ku noqon karaan caafimaadka dadka deggan, bulshada ama badqabka guriga.
**TUSAALE:** Waxaan u baahanahay inaan ka jawaabno warbixinnada ku saabsan qoyaanka iyo caaryada wakhti kooban gudahiis. Haddii aanny guriga soo geli wayno, gurigu wuxuu noqon karaa mid halis ah muddo dheer.
**TUSAALE:** haddii ay jirto biyo ka soo daadanaya guri kale, waxaannu u baahan karnaa inaannu soo galo gurigaaga haddii aannu aaminsanahay in biyuhu ka soo daadanayaan gurigaaga.

**Beddelid aan la Ogolaanin**
Haddii kireystuhu wax ka beddelo guriga iyada oo aan oggolaansho laga haysan Golaha

Deegaanka  Magaalada Bristol, ama uusan bixin macluumaadka loo baahan yahay, Golaha Deegaanka wuxuu u baahan doonaa inuu soo galo guriga si uu u hubiyo bedqabka guriga.

Haddii Golaha Deegaanku  u arko in isbeddelka guriga sameeyay uusan ahayn mid bedqab leh, waa inaannu hagaajinno ama fujinno wixii la sameeyay, oo kireystaha ayaa bixinaya qarashka ku baxa hawshaas.

**Shaqooyinka La Qorsheeyay**
Golaha Deegaanka Magaalada Bristol wuxuu u baahan karaa inuu soo galo guriga si uu u qabto dayactirrada la qorsheeyay. Shaqooyinkan waxaa ka mid ah: dib u habaynta  guryaha, hagaajinta iyo mashaariicda kale  lagu hagaajinayo guryaha.
**TUSAALE:** waxaannu u baahan karnaa inaannu galo gurigaaga si aan u beddelno saqafka guriga.

**Hantidhowrka Kirada**
Golaha Deegaanka Magaalada Bristol wuxuu u baahan yahay inuu soo galo guriga si uu u sameeyo hantidhowrka kirada  5tii sano mar. Hantidhoorka kiradu  wuxuu u oggolaanayaa Golaha Deegaanka  inuu hubiyo in kireystayaashu yihiin kuwo meel bedqab ah ku nool oo helaya taageerada ay u baahan yihiin, sidoo kale wuxuu noo oggolaanayaa inaannu hayno macluumaadkaaga xiriirka  waqtigan la joogo. .

Waxay kale oo  noo suurtagelinaysaa inaannu  hubinno tayada adeegyada Guryaha iyo Mulkiilaha Guriga. Mudnaanta waxaa la siiyaa kireystayaasha aynan dhowaan la soo xiriirin.

**Sahannada Xaaladda Guriga**

Golaha Deegaanka  Magaalada Bristol wuxuu u baahan yahay inuu guriga soo galo  si uu u sameeyo Sahannada Xaaladda Guriga 5tii sano mar. Sahanada waxaa sameeya xeeldheerayaal baaris, oo waxay si dhow u kormeeraan  gurigaaga si ay u hubiyaan inuu yahay mid bedqab leh iyo si ay nooga caawiyaan qorsheynta dayactirrada  mustaqbalka. Ma eegi doonno nadaafadda ama sida uu u habaysan yahay gurigaaga, kaliya waxaannu hubin doonnaa haddii gurigu buuxiyay shuruudaha heerarka badqabka dhismaha.

**Dacwooyinka Xaaladda Guryaha / Dayactir La'aanta**

Qaar ka mid ah shirkadaha qareennada ah waxay la xiriiraan kireystayaasha si ay uga caawiyaan inay dacwad ka soo gudbiyaan  mulkiilaha guriga dawladda ee deegaanka (Golaha Deegaanka) sababo la xiriirta xaaladda guriga awgood.

Si aan uga jawaabno dacwooyinkan, shaqaalaha Golaha Deegaanka  Magaalada Bristol waa inay helaan oggolaansho si ay u soo galaan guriga una dayactiraan. Haddii naloo diido inaannu soo galno guriga ama aan la  oggolaanin in la qabto  shaqooyinka qaarkood, gurigu wuxuu noqon karaa mid halis ah muddo dheer inta uu qareenku la xaajoonayo Golaha Deegaanka.